Horumarka ilmagaaha

Heerarka waxbarashada 2016–17 sanad dugsiyeedka

Washington waxay leedahay K-12 heerarka waxbarasho kaas oo qeexaya aqoonta iyo xirfadaha arday kasta u baahan yahay inuu diyaar u yahay xirfadiisa, kuliyada, iyo nolosha marka ay dhameeyaan dugsiga sare.

Xaga hoose waxaa ku qoran tusaalooyin kooban oo ah ujeedoonyinka waxbarashada muhiimka ah ee Washington ee fasalka 7aad.
Wixii macluumaad dheeraad ah dhamaystir, booqo:

www.YourChildsProgress.com

- **Farshaxanka.** Abaabul dheel adiga oo adeegsada qalabka dheesha; dooro muusiko ku saleysan awoodda; isbarbar shig noocyada iyo qaababka masraxa; ka jawaab farshaxanimada.
- **Farsamooyinka casriga ah ee waxbarashda.** Safar qayaali ah ku mar Washington si aad u muujisid sasaanka tirada dadka 100kii sanno ee la soo dhaafay.
- **Farshaxanka luqada ingiriisida (ELA).** Aqoonso fikradda dhexe ee ku jirta qoraalka, soo saar qoraal cad oo isla socda una qoran siyaabo kala duwan, la wadaag bandhigyada cilmi baarista.
- **Waxbarashada jidhka iyo Caafimaadka.** Yeelo karti xagga cayaaraha la baddalay, hawlaha laxanka iyo nasashada, hagaaji xirfadaha fakarka muhiimka ah si aad isaga ilaalisid xaaladaha aan ammaanka ahayn.
- **Xisaabta.** Baro xariirka saamiga iyo xalli masalooyinka ka kooban dhowr talaabo ee ku lug leh nambarada toganaha iyo tabanaha, jajabyada iyo desimalka.
- **Sayniska.** Baro injineeriyada, soo saar qaababka, iyo baar warcelinta ka dhexeyso siistemyada.
- **Cilmiga Bulshada.** Baarista taariikhda duniga iyo taariikhda gobolka Washington lana raaciyo caqiido iyo fikrado xagga madaniga, dhaqaalaha iyo joqraafiyada.

Washington sidoo kale waxy leedahay heerarka **is dhexgalka deegaanka iyo sii waddida, Luqadaha Adduunka, xirfafadaha iyo farsamada gacanta** (Qaababka iyo heerka warshadaha ee dugsiga dhexe iyo sare), **aqoonta sare ee luqada ingiriisiga** (ELA, xisaabta iyo sayniska), iyo sidoo kale tilmaamaha **waxbarsho hore** (fasalka dhalashada-3aad) in la dhamaystiro waxbarashada si fiican loo soo koobay ardayda oo dhan.

Waxbarasho gaara: Ardayda hesha adeegyada waxay leeyihiin degaan, dib u habayn, iyo taageerada lagu tilmaamay qorshahooda waxbarashada shaqsiga ah.

Bartayaasha luqada ingiriisida: Ardayda baranaysa in ay ku hadlaan Ingiriisida waxay leeyihiin heerarka aqoonta luqadda ka caawiya macalimiinta in ay qorsheeyaan guud ahaan maadooyinka ku habboon heerka arday kasta ee horumarka luqadda.

FASALKA 7

Ujeedooyinka Waxbarashada Gobolka Washington

Gobolka Washington Sharci Dejinta ayaa aasaasay afar ujeeddo oo waxbarashada ah si ay u bixiyaan saldhigga horumarka ee dhammaan heerarka waxbarashada tacliinta ee gobolka:

1. Akhri fahamka, u qor si fiican, oo ula xidhiidh si guul ah siyaabo kala duwan iyo goobo iyo dhagaystayaal kala duwan;
2. Baro oo codso aqoonta guud iyo mabaadi'da xisaabta; bulshada, jidhka, iyo cilmiga nolosha; cilmiga bulshada iyo taariikhda, oo ay ku jiraan dhaqamada iyo ka qaybgalka wakiilka dowladda; juqraafiga, farshaxanka; iyo caafimaadka iyo jidh dhiska;
3. Fikir si falanqayn ah, macquul ah, iyo hal-abuurimo ah, iyo in ay dhexgalaan qorista cilmiga casriga ah si fiican iyo sidoo kale waayo-aragnimada kala duwan si loo dhiso xukun sababaysan iyo xalinta dhibaatooyinka; iyo
4. Fahan muhiimadda shaqada iyo maaliyadda iyo sida soo waxqabadka hawsha, dadaalka, iyo go'aannada si toos ah u samaynaya mustaqbalka iyo fursadaha waxbarasho.

Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha
Office of Superintendent of Public Instruction
www.k12.wa.us

September 2016, Publication No. 16-0038

Imtixaanka Gobolka Washington

Sharciga Federaalku waxa uu rabaa imtixaan sanadle ah ardayda fasalada 3-8 iyo hal mar dugsiga sare ee farshaxanka Af Ingiriisiga (ELA) iyo xisaabta, iyo fasalada 5 iyo 8 iyo hal mar dugsiga sare ee sayniska. Gobolka Washington ayaa sidoo kale raba ardayda inay ka gudubto imtixaano gaar ah si ay xaq ugu yeshaan inay ka qalinjebiyaan dugsiga sare.

Inta badan ardayda fasalada 3-8 waxay qaadan doonaan **Smarter Balanced** imtixaanada ELA iyo xisaabta, iyo Qiyaasaha Horumarka Aradayda (**MSP**) sayniska. Imtixaanadan waxa la qaadi karaa iyaga oo leh ama aan lahayn qalab, taageero, iyo fududeyn.

Loolanka weyn ee ardayda ee qoorista Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah (IEP) oo ay qaataan qiimaynta kale ee ELA, xisaabta, iyo sayniska, loo yaqaan Washington - Helitaanka Waxbarashada iyo Cabbiraada (**WA-AIM**).

Imtixaanka Gobolku waa *marna* waxa kaliya ee xukuma xirfadaha iyo aqoonta tacliinta ardayga. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan waxbarashada ilmahaaga, fadlan la xidhiidh macallinka ama dugsiga ilmahaaga.

Ardayda waxbarashada in ay ku hadlaan Ingiriisiga ee fasalada K-12 waxay qaadan Qiimaynta Luuqadda Aqoonta Ingiriiska ee Qarniga 21aad (**ELPA21**). Tani waa qiyaasta qiimaynta xirfadaha luqadda Ingiriisiga iyo koritaanka sanadlaha ah ee akhriska, qoraalka, dhegaysiga iyo ku hadalka. Ardayda hesha heerka aqoonta ee soo Shaacbaxaya ama horumaraya ELPA21 waxay u qalmaan inay helaan adeegyo taageera barnaamijka luqadda Ingiriisiga.

Imtixaanka Gobolka

Waa maxay sababta ilmahaygu ugu baahan yahay in uu qaato imtixaanada gobolka?

Imtixaanka gobolka waxaa u baahan sharciyada gobolka iyo federaalka. Ma aha sida keliya ee si aad u ogaado sida ardaygu ku yahay dugsiga, laakiin waxa ay caawin kartaa inay aqoonsadaan arimaha waxbarashada si degdeg ah halkii marka dambe.

Dugsiga sare, gudbbida imtixaanada gobolka ama ogolaansha kale waxa uu muujinayaa ardayda leeyiin asaas adag oo waxbarasho, wax dhib ah meeshay dugsi u tegaan ama waxa ay doortaan in ay sameeyaan ka dib marka ay qalin jebiyaan.

Ma arki karaa imtixaanka ilmhayga?

Sababo ammaan imtixaanka, ardayda waxaa laga yaabaa in aanay wada hadlin qanacsanida imtixaanada gobolka asxaabta iyo qoysku. Si kastaba ha ahaatee, qoysaska waa lagu soo dhaweynayaa in ay dib u eegaan qoraalka caruurtooda ka dib markii ay u dhibo helay.

Heerka Imtixaanka Fasalka, 2016-17

	K	1aad	2aad	3aad	4aad	5aad	6aad	1aad	8aad
ELA				✓	✓	✓	✓	✓	✓
Xisaabta				✓	✓	✓	✓	✓	✓
Sayniska						✓			✓

Qoraallo:

- Qiimeynta Aqoonta Luqadda Ingiriisida waxay lagama maarmaan u tahay ardayda baranaya ku hadalka luqada Ingiriiska. Ardayda waan la tijaabiyo si ugu qalmaan in ay helaan taageero. Waxay sii wadaan si ay u tijaabiso, sannad kasta, ilaa ay ka gaaraan aqoonta luqadda Ingiriisida.
- Tijaabooyin kale ayaa loo baahan yahay, laakiin degmooyinku waxay leeyihiin xoogay dabacsanaan ah oo ay ku dooran karaan imtixaanada iyo in go'aansadaan marka ardayda laga qaado. Tijaabada fasalka labaad waxaa kamid ah akhriska iyo imtixaanada fasalka-ku-salaysan cilmiga bulshada, farshaxanka, caafimaadka iyo waxbarashada jidh dhiska iyo maadooyinka kale. Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa meelaha cinwaanka ee http://www.k12.wa.us/assessment/default.aspx.
- Dugsiyada degmooyinku sidoo kale waxay baahan karaan baaritaan dheeraad ah. Ka Hubi degmadaada wixii faahfaahin dheeraad ah.

Waqtiyada Imtixaanka Gobolka

Imtixaanka waxaa loo qorsheeyey waqtiyadaan hoos ku qoran gudahood. La xidhiidh dugsiga degmada ee degaanka si aad u ogaato taariikhda ilmahaaga lagu imtixaamayo.

WAQTIYADA IMTIXAANKA GOBOLKA	
Oktoobar 17– Abriil 7:	WA-AIM
Feb 1– Mar 14 *(gaadh)*:	ELPA21
Maarso 6 – Juun 9:	Smarter Balanced
Abriil 17– Juun 2:	MSP Sayniska

OSPI waxay bixisaa wararka dhibcaha ee dhammaan imtixaanada kor ku xusan. La xidhiidh dugsiga degmada ee degaanka wixii macluumaad dheeraad ah.

Maxaa Dhibcaha imtixaanka gobolka looga jeedaa?

Heerka **4** — **Heerka gaaritaanka ka sareeya:** Wuxuu muujiyaa horumar horumarsan xagga macalinimada oo ah aqoonta iyo xirfadaha maadada.

Heerka **3** — **La kulmaya heer gaadhitaanka:** Wuxuu muujiyaa horumar horumarsan xagga macalinimada oo ah aqoonta iyo xirfadaha maadada.

Heerka **2** — **Ku dhowaan la kulmi karra heerka gaadhitaanka:** laga yaabaa in u baahan yahay horumarin dheeraad ah si ay u muujiyo aqoonta iyo xirfadaha maadada.

Heerka **1** — **Lama kulmayo heerka gaadhitaanka:** Ubaahan Horumarin la taaban karo si ay u muujiyaan aqoonta iyo xirfadaha maadada.

Office of Superintendent of Public Instruction
Old Capitol Building
P.O. Box 47200
Olympia, WA 98504-7200

www.YourChildsProgress.com

September 2016, Publication No. 16-0038